

Kaarka Ka Jooji Isticmaalka

Kaarka Ka Jooji Isticmaalka waa qayb heerka-kaarka ah oo uu ebtEDGE leeyahay kaas oo dadka kaarka haysta u oggolaanaya in ay si ku-meelgaar ah uga joojiyaan kaarka in loo isticmaalo wax-ku-iibsasho ama cusboonaysiinta PIN-ka.

Macaamiisha waxay isticmaalka ka joojin karaan ama isticmaalka u oggolaan karaan kaarkooda ilbiriqiyo gudahooda iyaga oo galaya app-ka telefoonka FIS ebtEDGE ama iyaga oo maraya barta kaar-haystaha ee ebtEDGE.

Marka qaybta “isticmaalka ka jooji/freeze” ay shidan tahay, waxyaabahan soo socda MA dhacayaan:

- libka cuntada ama kaashka
- Kaash kala-bixid
- Beddelka ama doorashada PIN-ka
- Weyddiimaha baaqiga/haraaga

Sida Kaarka Looga Joojiyo Isticmaalka

Uga gal FIS ebtEDGE kaar-hayste ahaan halkan www.ebtedge.com ama ka gal app-ka telefoonka halkan www.fisglobal.com/ebtedgemobile.




Gelidda Kaar-haysta

- Eeg Baaqiga
- Dib-u-eeg Wax-iibsiyada
- Kaarka Iska-beddel


[Gal](#)

1. Dooro akoon si aad u eegto **Warbixinta Akoonka oo Kooban**.
2. Ka dooro **Kaarka Ka Jooji Isticmaalka** Adeegyada Akoonka.
3. Ka dooro **Hagaag/OK** farriinta Xaqiijinta Kaarka Ka Jooji Isticmaalka.




Wax-iibsiga


1. U gal gudaha FIS ebtEDGE kaar-hayste ahaan ama gal app-ka telefoonka gacanta.



2. Dooro akoon si aad u eegto **Warbixinta Akoonka oo Kooban**.
3. Dooro **Ilaali Akoonkeyga**.



4. Hawlgeli **Jooji Wax-iibsiga Gobolka Ka Baxsan**.
5. Hawlgeli **Jooji Wax-iibsiga Internet-ka**.



KA WARQAB U DIYAAR-GAROW



EBT

Ka ilaali Dheefahaaga
Kaar Xadidda/
Lunsadka iyo In Kaar
u eg laga sameysto

 Washington State
Department of Social
& Health Services
Transforming lives

DSHS 22-1911 SM (1/23) Somali

Waa maxay Kaar Xaddid/Lunsad?


Xadidda/lunsadka ayaa dhacda marka aalado si sharci-darro ah loogu rakibo/xiro mashiinnada ATM-ka ah, meelaha iibka ama mashiinnada shidaalka kuwaas oo diiwaangeliya xogta ama PIN-ka kaar-haystaha. Dembiilayaashu waxay adeegsadaan xogtan oo ay ka sameeyaan kaarar ammaah/deyn oo been-abuur ah, ka-dibna waxay lacagaha ka xadaan akoonnada dhibbanayaasha.

Xatooyada kaar xadidda waxay saameyn kartaa qof walba oo isticmaala kaararka ammaahda, kuwa lacagta ku jirta ama kaararka EBT ee lagu adeegsado mashiinnada ATM, kaalimaha shidaalka, makhaayadaha ama dukaamada tafaariiqda iibiya.



Soo-sheeg oo Beddel

Isla-markiiba iska beddel kaarkaaga EBT, PIN-kaaga beddel oo warbixinta boolis u soo gudbi haddii aad u maleynayso in aad tahay dhibbanaha kaar xadid.



Kala-xiriir FIS ebtEDGE app-ka telefoonka, ama si degdeg ah u wac 1-888-328-9271.

Kaar Xadidda ka dhacda ATM-ka ama Meesha Iibka

Aaladaha xadda ATM ayaa caadi ahaan lagu rakibaa kaar akhriyaha asalka ah korkiisa.

Qaar ka mid ah aaladaha kaarka xadda ee ATM-ka ah ayaa la dhexgeliyaa gudaha kaar akhriyaha, la dhigaa meesha wax lagu iibiyo ama fiilooyin bannaanka yaalla agtooda.

Kaamirooyin lagu rakibo duleel aad u yar oo ku yaalla meel xagga sare ee ATM-yada ah ayaa duuba macaamiisha oo PIN-kooda gelinaya. Meelaynta kaamirada duleelka yar lagu xiro ayaa si aad ah u kala duwan.

Xaaladaha qaarkood, loox-xarfeed dulsaar ah ayaa la isticmaalaa beddelka kaamirooyinka duleelka yar lagu xiro si loogu duubo PIN-yada. Loox-xarfeedka dulsaarka ah ayaa duubaya/diiwaangelinaya riixisyada loox-xarfeedka ee macmiilka.

Aaladaha kaarka lagu xado ayaa keydiya xogta oo laga soo degsado ama si fiilo la'aan ah ayaa goor dambe loo wareejin karaa.

Sida la isaga Ilaaliyo Aaladaha Kaarka Xadda

Ka hor inta aadan isticmaalin mashiinka ATM ama meesha iibka, iska hubi arrimaha isku toosnaanta u dhaxeysa kaar akhriyaha iyo looxa/cadka ka hooseeya. Aaladaha kaarka lagu xado ayaa badanaaba la dulsaaraa kaar akhriyaha dhabta ah korkiisa, taas oo ka dhigeysa in uu bannaanka u soo baxo isaga oo xagal aan caadi ahayn ah ama in uu daboolo fallaaraha ku yaalla looxa.



Maxaan Sameyn karaa si aan u Ilaaliyo Kaarkeyga EBT?

- Si joogto ah u beddel PIN-kaaga.
- Mar kasta eeg baaqigaaga iyo wax-iibsigaaga.
- PIN-kaaga haka dhigin wax fudud oo la qiyaasi karo.
- Haka jawaabin wacitaannada telefoonka, email-yada ama farriimaha qoraalka ee ku weyddiisanaya lambarka kaarkaaga ama PIN